

Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya
Dowlad Goboleedka Galmudug
Wasaaradda Maaliyadda & Horumarinta Dhaqaalaha



Galmudug State
Ministry of Finance & Economic Development

جمهورية الصومالية الفدرالية
حكومة إقليم جلمدج
وزارة المالية وتنمية الإقتصاد

Taariikh: 27/12/2018

**Tilmaanta/Amarka E –
Fahamidda Kantaroolka Dib-u-qoondaynta Miisaaniyadda ee FMIS & Ka-
reebnaanta Deeq-bixiyaha Kantaroolidka**

1. Awoodda, Hadafka & Baaxadda

1.1 Tilmaantan waxaa la soo saarey iyada oo laga ambaqaadayo Qaybta 22aad, Faqradda 1aad iyo Qaybta 26aad, Farqadda 1aad ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha, 2018, oo ay la socdaan faahfaahin ku saabsan qaab-dhismeedka kantaroolka ee lagu qeexay Qaybta 6aad ee Xeerka Qoondoynta ee Sannadlaha ah iyo Faqradda 1.4 33 Xeer-nidaamiyaha 4aad, Abuurista Habraacyada Miisaaniyad-Fulinta.

1.2 Hadafyada tilmaantan laga leeyahay waa:

- In ay bixiyaan raadraac faahfaahsan oo ku saabsan fahamka sida nidaamsan ee loogu kantaroolo dib-u-qoondoynta miisaaniyadda gudaha Hannaanka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda ee loo yaqaano FMIS-ka Dowlad-goboleedka.
- In ay dib-u-eegaan qodobbada dib-u-qoondoynta gaarka ah maadaama ay la xiriiiraan mashaariicda maaliyadda ka hela deeq-bixiyeyaasha sida uu dhigayo Xeerka Qoondoynta ee sannadlaha ah.

1.4 Tilmaantan waxaa lagu maamulayaa dhammaan hay'adaha dowladda ee Dowlad-goboleedka Koonfur-Galbeed ee Soomaaliya ee lagu qeexay Qaybta 1aad, Faqradda 3aad ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha, 2018 ee maaliyadda ka hela sanduuqa maaliyadda mideysan.

2. Raadraac

2.1 Xeerka Qoondoynta ee Dowlad-goboleedka Koonfur-Galbeed wuxuu qeexayaa sida soo socota:

“Qaybta 6aad: Wax-ka-beddelidda Qadarka/Tirada Lacagaha La Ansaxiyey

Agaasimaha Miisaaniyadda waxaa uu qadarada/tirooyinka lacagaha la ansaxiyey u kala wareejin karaa qaybaha miisaaniyadda Wasaarad ama Wakaalad/Hay'ad Leedahay ee ku jira Jadwalka 1aad ee Xeerkan, waa marka dib-u-qoondoyntu aaney ka badneyn, wadaraahan, 10%¹ ee qaybta wax laga qaadayo. Lacagaha loo kala wareejinayo Wasaaradaha lama oggolaanayo iyada oo aan wax ka beddelid lagu sameynin Jadwalka iyada oo loo marayo tallaabooyin Qoondoyimo Dheeri ah.

Sharciyada sare waxaa laga soo reebay mashaariicda ay deeq-bixiyaashu maalgaliyaan halka maaliyad-siinta deeq-bixiyeyaasha aan loo qoondeyn wax Wasaarad ah ama summad qoondeyn waxaanna lagu dabakhayaa oggolaanshaha deeq-bixiyeyaasha ee dib-u-bixinta ama haddii inta lagu guda jirro muddada sannad maaliyadeedka ay deeq-bixiyeyaashu ku taliyeen in wax laga beddelo qoondoynta miisaaniyadda asalka. Sidaa daraadeed, iyada oo oggolaansho ay horey uga wada gaareen deeq-bixiyaha iyo Agaasimaha Miisaaniyadda, kala wareejinta madaxyada iyo wasaaradaha dhaxdooda ah ee tirada/boqolayda loo cayimay, taas oo aan lagu dabakheynin xaddidaadaha kor lagu xusay.”

¹ Nisbadan waxaa wax-ka-beddeli kara Baarlamaanka marka uu rabo, haddii uu go'aamiyo in nisbadu ay khaldan tahay, isagoo kala tashanaya Wasiirka Maaliyadda. Waa in si fiican loo ogsoonaado in nisbadda sida xad-dhaafka ah u badan ay si wax-ku-ool ah u hor-istaagayso rabitaanka Baarlamaanka iyadoo si weyn oo mug leh ugu wareejinayso go'aanka ku saabsan dejinta mudnaanaha siyaasadda kharash-gareynta shaqaalaha rayidka ah oo aan lagu hayn laanta dowladda ee go'aan-qaadashada.

Si loo hubiyo in loo hoggaansamo Xeerka Qoondoynta, Hannaanka FMIS-ka waxaa loo qaabeeyay in uu ku kantaroollo dib-u-qoondoynta miisaaniyadda nisbada lagu qeexay² Qaybta 6aad ee xeerka qoondoynta, iyo sidoo kale in la diido lacagaha in loo kala wareejiyo Wasaaradaha.

3. Guudmar

3.1 Mabda'a guud waa in kantaroolka Dib-u-qoondoynta Miisaaniyadda uu ku saleysan yahay nuqullada fawjarka – Fawjarrada Miisaaniyadda (BV) iyo Fawjarrada Dib-u-qoondoynta Miisaaniyadda ee la xiriira (BRV)³. Fawjarrada Miisaaniyadda (BVs) waxay abuuraan miisaaniyadaha waana in ay isticmaalaan nuqullo, iyadoo nuqulka 1aad uu yahay qoondoynta asalka ah iyo nuqulka 2aad oo dheeraad ah. BRVs waxay sidoo kale adeegsan doonaan nuqullada. Xeerka PFM (qaybta 19aad), waxaa lagu oggolaadey in la bixiyo qoondoynta dheeraad ah bartamaha sannadka, oo sidaa darteedna noqonaya nuqulka BV ee 2aad.

3.2 Bilowga sannadka, BV-v1 (Fawjarka Miisaaniyadda, nuqulka 1aad) ayaa la adeegsanayaa si loo abuurdo miisaaniyadda. Kani waxaa loo yaqaanaa nuqulka BV ee caamka ah. Waqtigan ka-dib, ilaa nuqulka miisaaniyad cusub laga isticmaalo (ma aha ilaa tan dheeriga ah), dhammaan dib-u-qoondoynta miisaaniyadda waa in ay isticmaalaan Fawjarka Dib-u-qoondoynta Miisaaniyadda oo leh nuqulka 1 (BRV_v1).

3.3 Haddii BRV lala isticmaalo nuqul aan ahayn v1, marka BR caamka ah uu yahay v1, hannaanka wuxuu soo saari doonaa farriin khalad ah oo sheegaysa in nuqulka BRV uu khalidan yahay lana isticmaali karin.

3.4 Marka miisaaniyadda dheeriga ah la meelmariyo oona la cusboonaysiiyo wadarada miisaaniyadda sheyga xariiqaha, nuqulka 2aad ee BV waa in la adeegsado (BV_v2) si loo dhaqangeliyo isbeddeladan. Marka BV_v2 la isticmaalo markii ugu horreysay, tani waxaa loola jeedaa in dhammaan dib-u-qoondoynta miisaaniyadda mustaqbalka ay isticmaalaan BRV_v2. Xataa haddii xaqiiqo dhawr ah aan lala cusboonaysiin BV_v2, hannaanka wuxuu u arkayaa BV caamka ah in uu yahay nuqulka 2aad. Hab kale ee lagu fahmayo fikraddan guud waa in xariiqaha sida wax-ku-oolka ah aan u cusboonaysiin miisaaniyadda dheerigaa ah in lagu cusboonaysiiyay qiime "0" ah marka loo fiiriyo hannaanka. Haddii qofka uu isku dayo in uu BRV_v1 uu isticmaalo wakhtigan, hannaanka wuxuu soo saari doonaa farriin khalad ah maadaama uu keliya aqoonsan yahay nuqulka 2aad laga bilaabo halkan. Haddii qofka uu isku dayo in uu isticmaalo BRV_v3, sidaasi si la mid ah ayaa loo diidi lahaa.

3.5 Fawjarrada dib-u-qoondoynta miisaaniyadda sidoo kale ma u saamaxayaan qofku in uu lacagaha u kala wareejiyo wasaaradaha waxayna soo saarayaan farriin khalad ah haddii tani la isku dayo.

3.6 Lifaafa 1aad ee ku lifaaqan Tilmaantan waxaa uu bixinayaa tusaalooyin wax-ku-ool ah oo faahfaahsan si loo muujiyo sida xeerka kantaroolka dib-u-qoondoynta uu u shaqeeyo.

4. Tixgelinnada Mashruuca Maaliyadda Ka Hela Deeq-bixiye oo Loogu Talagalay Dib-u-qoondoynta

²Haddii nisbada ay isbedesho, nisbada kanraoolka ee FMIS waxaa loo cusboonaysiin karaa si waafaqsan nisbada sharciga ah.

³U-noqo *Tilmaanta/Amarka C, Adeegsiga hannaanada/nidaamyada FMIS, BPM & RMS* si aad uga hesho munaaqashada faahfaahsan ee fawjarka miisaaniyadda iyo fikradaha guud ee dib-u-qoondoynta fawjarka miisaaniyadda.

4.1 Ku Habboonaanta

4.1.1 Tixgelinnadan soo socda waxaa loogu talagalay mashaariicda maaliyadda ka hela deeq-bixiyayaasha ee maaliyadahooda soo marsiisa Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda (TSA) sidaa darteedna adeegsada FMIS-ga Dowlad-goboleedka si ay u fuliyaan mashruuca. Tilmaantan kuma habboona maaliyad-siinta deeq-bixiye Cid 3^{aad} bixinaysa.

4.1.2 Ka sakow mashaariicda maaliyadaha ka hela deeq-bixiyayaasha ee soo mara xisaabta TSA, tilmaantan sidoo kale waxay si gaar ah uga hadashaa maareynta dib-u-qoondeymaha miisaaniyadda ee qayta Kharashaadka Joogtada/Soo noqnoqda ee Aan Mushaaraadka Ahayn (NSRC) ee mashruuca II ee Kharashaadka Soo Noqnoqda & Dib-u-habaynta Maaliyadda, oo uu maamulo Bangiga Adduunka.

4.2 NSRC

4.2.1 Raadraac

4.2.1.1 Miisaaniyadda NSRC ee uu oggolaadey Bangiga Adduunka ee loo yaqaano *World Bank* (WB) waa heshiis dib loogu bixinayo kharashaadka ay hore u bixisay maaliyadooda xisaabta TSA, haddii shuruudaha xaq u lahaanshaha qaarkood laga soo baxo. Qiimaha maaliyad-siintan ee la oggolaaday, oo lagu dabakhayo shuruudaha laga soo baxay, laguma xisaabinayo miisaaniyadda xisaabta gaarka ah ee kharashaadka ay ku soo dalacdey, wasaarad/wakaalad, balse xisaabta mideysan oo ay iska leedahay Wasaaradda Maaliyadda, Wasaaradda Waxbarashada iyo Wasaaradda Caafimaadka. Sababta oo ah, geeddi-socodkan shaqada/hawsha gaarka ah iyo sharciyadan waxaa loo baahan yahay in la soo bandhigo si loo maamulo fulinta.

4.2.1.2 Intaa waxaa dheer, mashaariicda maaliyadaha ka hela deeq-bixiyayaasha waxaa laga yaabaa in aysan ku halwgalin sharciyada dib-u-qoondeynta, sidaa daraadeed ma aha in loo xaddido hab isku mid ah. Qaybahan soo socda ayaa sidoo kale ka hadli doona arrinta.

4.2.2 Arrimaha la ogyahay ee Xisaabaadka NSRC, Miisaaniyad-dejinta iyo Waafaqsanaanta Xeerka Qoondeynta

4.2.2.1 Faqradahan soo socda waxay iftiimiyaan sababta Qaybta 6aad ee Xeerka Qoondeynta loogu baahan yahay ka reebitaan (faqradda labaad ee Qaybta 6aad) ee loogu talagalay mashaariicda maaliyadaha ka hela deeq-bixiyayaasha, gaar ahaan mashruuca RCRF II, ee soo mariya maaliyadaha xisaabta TSA-ga.

1. 10%⁴ kantaroolka Bisn

- Ugu horreyn, waxaa la dejiyaa miisaaniyadda dhammaan kharashaadka hal wasaarad [Wasaaradda Maaliyadda (MoF), Wasaaradda Waxbarashada (MoE) ama Wasaaradda Caafimaadka (MoH) iyo haddii dowlad-goboleedka ay doonayso in ay u adeegsato wasaaradaha kale (kharashaadka miisaaniyad loogu dejiyay lacag duuduub ahaan gudaha Wasaaradda Maaliyadda), waxay u baahan doonaan in ay u kala wareejiyaan miisaaniyadda wasaaradaha, ee aan la oggolayn tallaabooyinka qoondeynta dheeriga ah la'aan ee waafaqsan Xeerka PFM. Xataa haddii kharashaadka lagu xaddido keliya Wasaaradda Maaliyadda, waxaa keliya loo saamaxayaa in laga soo wareejiyo xisaabta mideysan ee sii kororta oo leh xaddidaad 10%.

⁴Boqoleydan waa la beddeli karaa, iyada oo lagu saleynayo ansaxinta Baarlamaanka, haseyeeshee mabaadii'da la sharxay, iyada oo aan loo eegayn qadarka/tirada boqoleyda, sidooda ayay ahaanayaan.

2. Kharashaadka Miisaaniyadda La Dejiyay ee Wasaarad/Waax/Wakaalad kasta (MDA)
 - Marka labaad, sida ku xusan shuruudaha xaq u lahaanshaha NSRC, NSRC waa in ay qayb ka noqdaan miisaaniyadda MDA kasta, sida ku xusan qodobka 5aad ee shuruudaha (eeg hoos). Caqligal ahaan, qofka wuxuu u dejinayaa miisaaniyadda NSRC sida uu u dejiyo mushaaraadka shaqaalaha rayidka ah, isagoo ku diiwaangelinaya sumadda mashruuca RCRF ee saxda ah. Nasiib-darro, lama garanayo wakhtiga la dejinayo miisaaniyadda wasaaradaha raadsan doona in ay helaan ama hadafka. Si loo hubiyo in miisaaniyadda NSR lagu diiwaangeliyo qoondaynta iyo ta la soo sheegi karo, waa in miisaaniyadooda loo dejiyo sida lacag duuduub ah, si kastaba ha ahaatee weli waa in loo dejiyaa miisaaniyadda NSRC qaab MDA ahaan ah, balse maaliyadda laga siiyo TSA. Tani waxaa si wax-ku-ool ah uga dhasha miisaaniyad-dejin si laba-goorood ah oo loogu talagalay NSRC keliya. Ka eeg falanqeyn dheeraad ah oo arrintan ku saabsan qobodka 3aad ee hoos ku xusan.
 5. **Si uu xaq ugu yeesho, kharashaadka MDA kasta** waa in uu noqdaa gudaha:
 - a. Miisaaniyadda sannadlaha ah ee Dowlad-goboleedka la beddelay ee kala duwan, iyo
 - b. Miisaaniyadda RCRF sida loogu soo bandhigay heshiiska deeqda iyo sida ay dhigayaan wax-ka-beddelaad kastoo dheeri ah.
3. NSRC waa in marka hore lagu xisaabiyo miisaaniyadda xisaabta TSA ka-dibna waa in la bixiyo, markaas ka-dibna dowlad-goboleedka waxay raadinaysaa lacag-celin, haddii lagu guuleystana, qadarka/tirada dib ayaa loo qoondeynayaa si loo muujiyo maalgelinta laga helay RCRC (sumadda mashruuca). Farsamo ahaan, tani waxaa loola jeedaa in loo baahan yahay in ay marka hore jirto miisaaniyad hoostagaysa mashruuc aan RCRF ahayn (000000) oo bixinaya lacag-bixinnada, ka-dibna dib ayaa loo qoondeyn karaa. Sababtoo ah miisaaniyadda RCRF waa in la geliyo hannaanka FMIS sidaa awgeed warbixinnada miisaaniyadda waxay muujin karaan qiimaha miisaaniyadda NSRC ee ka ansaxiyey, qofka waa in uu si wax-ku-ool ah u diyaariyo xaalad loogu talagalay dejinta miisaaniyadda kharashaadka NSRC oo si laba-goorood ah, mid loogu talagalay mashruuca 000000 iyo mid kale oo loogu talagalay mashruuca 25xxxx (ama lambaro kastoo mashruuc ee dowlad-goboleedka ku habboon). Haddii mid keliya miisaaniyadiisa lagu xisaabiyo 25xxxx oona loo diiwaangeliyo si ka soo horjeeda, inkastoo laga bixiyay xisaabta TSA, waxay keeni kartaa dhibaato ka-warbixin halka warbixinta adeegsiga miisaaniyadda RCRF ay muujinayso kharashaadka RCRF iyadoon wax dhaqaale ah soo marin Xisaabta Mashruuca.
4. Mashaariicda deeq-bixiyeyaasha, soo mara xisaabta TSA, marka laga eego dhanka wax-qabadka waxaa ay yeelan karaan sharciyo dib-u-qoondeyn kala duwan ee aan u dhigmin sharciga 10% ee hadda ee Dowlad-goboleedka. Waxaa sidoo kale loo qaadan karaa in deeq-bixiyeyaasha ay sidoo kale beddeli karaan wasaaradaha kuwaas oo sidoo kale ka faa'iida inta lagu guda jiro mudada uu mashruuca soconaya. Kani wuxuu noqon karaa heshiis u dhaxeeya deeq-bixiyaha iyo dowladda, haseyeesee sugitaanka miisaaniyad dheeri ah oo la ansaxiyo (bartamaha sannadka) waxaa laga yaabaa in aysan ka soo bixin shuruudaha deeq-bixiyeyaasha. Tani hore ayay u dhacdey. Sababtan awgeed, Dowlad-goboleedka waxay ugu baahan tahay dabacsanaan Xeerka Qoondaynta si uu u bixiyo awood sharci oo sida ay u baahan yihiin deeq-bixiyeyaasha isbeddeladan loogu sameynayo miisaaniyadda.

4.3 Habka Miisaaniyad-dejinta, Xisaabaadka & Ka-warbixinta ee Mashaariicda Maaliyadaha Ka Hela Deeq-bixiyeyaasha

4.3.1 Xisaabaadka & Dejinta Miisaaniyadda NSRC

4.3.1.1 Misaaniyadda xisaabta mideysan, hal xisaab oo ka furan Wasaaradda Waxbarashada (MoE), hal xisaab oo ka furan Wasaaradda Caafimaadka (MoH) iyo xisaab kale oo ka furan Wasaaradda Maaliyadda (MoF). Dowlad-goboleedka ma garanayso sida loo kharash-gareyn doono marka la dejinayo miisaaniyadda (Wasaaradda ama xisaabta) haseyeeshee dowlad-goboleedka waxay ogsoon tahay in MDA kasta ay dejisay kharashaadkeeda hawlgallada sidaa awgeed waxaa loo dejiyay miisaaniyadda MDA kasta, sida looga baahan yahay shuruudaha xaq u yeelashada. Sababtoo ah waxaa jira khayraadka TSA oo aad u yar, mudnaanta ayaa waxaa la go'aamin doonaa wakhtigeeda iyadoo ku xiran kaashka la heli karo iyo mudnaanaha maaliyadaha TSA.

4.3.1.2 Marka kharash uu ku baxo MDA, kharashaadka waxaa lagu dalacayaa sumadda mashruuca ee aan la qoondayn (000000) maadaama TSA ay bixin doonto.

4.3.1.3 Marka lacag la bixiyo si lacag-celin loogu sameeyo TSA, tallaabooyinkan soo socda ayaa loo baahan doonaa:

1. KA wareeji miisaaniyadda “xisaabta weyn #226000”, sumadda mashruuca RCRF, Wasaaradda Maaliyadda KUNA wareeji wasaaradda ka baxay kharashka, iyadoo la isticmaalayo isla sumadda mashruuca RCRF. Isticmaal Fawjarka miisaaniyadda (ma aha fawjarka dib-u-qoondaynta) si loo sameeyo wareejinta waxaadna ugu yeertaa v1 si uu u beddelo sharciga dib-u-qoondaynta ee 10%.
2. Diyaari fawjarka Qoondada Miisaaniyadda ee loogu talagalay kharashka baxay (isticmaal lambarka nuqulka ee caamka ah)
3. Socodsii hawsha dib-u-bixinta lacagta iyadoo laga wareejinayo Xisaabta Mashruuca (PA) loona wareejinayo TSA. Waxaa lagu taliyay tani la sameeyo iyadoo loo marsiinayo jeeg muuqda sidaa awgeed dowlad-goboleedka waxay jooqteynaysaa dokumeenti lacag-bixin aan isbeddelin (PRV/PV) iyo silsilad oggolaansho oo loogu talagalay ujeeddooyin hantidhawr/baaritaan. Hay'adda waxay noqon doontaa:

Xisaabaadka PA

- Dr. Kharashka (Maaliyadda TSA/Wasaarad/Mashruuca NSRC/Goobta/Xisaabta)
- Cr. Bangiga PA (Maaliyadda TSA/Wasaarad/Mashruuca NSRC/Goobta/Xisaabta)

Xisaabaadka TSA

- Dr. Xisaabta Bangiga TSA (Maaliyadda TSA/Wasaarad/Mashruuca Aan La Qoondayn/Goobta/Xisaabta)
 - Cr. Kharashka (Maaliyadda TSA/Wasaarad/Mashruuca Aan La Qoondayn/Goobta/Xisaabta)
4. Diyaari Fawjar miisaaniyad tabane ah oo u dhigma qiimaha kharashka dib looga soo celiyay Wasaaradda kharashka ka baxay iyadoo la adeegsanayo sumadda mashruuca ee aan la qoondayn. Tani waxay hoos u dhigi doontaa miisaaniyadda xariiqa 6-tiro si loo hubiyo in uusan ka jirin miisaaniyad-dejin laba-goorood ah waraasadda xisaabtan (in loo kordhiyo si aan habboonayn qoondaynta sharciga ah). Maskaxda ku hay in qoondada maaliyadaha ee laga helay xariiqa miisaaniyadda luminaya in loo baahan karo in marka hore la yareeyo ka hor inta aan la diyaarin fawjarka miisaaniyadda tabanaha ah.

4.3.2 Ka-warbixinta

4.3.2.1 Siyaasadda kor ku xusan waxay macnaheeda noqon doontaa in dhammaan NSRC-da lagu kooxeeyaa hal xisaab hayn oo sugeysa isticmaalka wasaaradda, markaas ka-dib qadarka waxaa laga wareejinayaa xisaabta haynta iyadoo loo wareejinayo wasaaradda helaysa. Saameynta la taaban karo ee arrintan waa in xisaabtan haynta, ee midkood Wasaaradda Maaliyadda, Wasaaradda Caafimaadka ama Wasaaradda Waxbarashada, ay abuurayso nuqulka miisaaniyadda ee qiimaha

NSRC. Tani la'aanteed, Dowlad-goboleedka ma awoodi doonto in ay ka daabacdo warbixinnada miisaaniyadda mashruuca RCRF hannaanka Bisan ee waafajiya miisaaniyada RCRF ee la ansaxiyey. Muddo ka-dib, nuqul ka sameynta miisaaniyadda waxaa hoos u dhigaya qiimaha sheegasho kasta ee NSRC ee loo arko in ay xaq u leedahay iyo lacag-celinta TSA.

4.3.2.2 Marka laga eego dhanka aragtida warbixinta GFS/IPSAS, kala-saaridda (xisaabta/wasaaradda) waxaa laga soo saari doonaa xisaabaadka marka lacagta la kharash-gareeyo oo maaliyadahana dib loo soo celiyo.

5. Dhaqangalka

5.1 Tilmaantan waxaa loo tixgelinayaa in ay dhaqangashey taariikhda la soo saarey ee ah DD/MM/YYYY

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda & Hor. Dhaqaalaha

Siciid Siyaad Shirwac



Lifaaqa 1aad – Fahamidda Kantaroolka Dib-u-qoondaynta Miisaaniyadda oo leh tusaalooyin

Mabaadii'da Guud:

- Wakhtiga xariiq luminaya lama dhimi karo in ka badan 10%
- Xariiq helaya kuma xadidna qadarka lagu dari karo
- Qiimaha **BV_v2 (dheeri)** = Qiimaha Dheeriga ah – [BV_v1 +/- BRV_v1]
- Marka xariiq la isku hagaajiyo iyadoo sabab u ah miisaaniyad dheeri ah oo la meelmariyay, boqolleyda dib-u-qoondaynta waxay ka bilaabeysaa mid cusub 10% ee qiimaha dhowaan la isku hagaajiyay, oo loo qeexay sida: [BV_v2 + BV_v1 +/- BRV_v1]
- Waxaa jiri kara BVs iyo BRVs badan oo ka soo horjeedo xariiq
- Marka fawjarrada dib-u-qoondaynta la diyaariyo, tijaabada hannaanka ma aha oo keliya guud ahaan sharciga 10% balse dib-u-qoondaynta ka dhalanaysa ma yareyn karto maaliyadaha xorta ah ee laga heli karo (aan deyn ku jirin) xariiq ka hooseeya eber, xataa haddii guud ahaan sharciga 10% aan la jebin. Maaliyadaha Xorta ah ee La Heli Karo waxaa lagu qeexi karaa laba heerar:

Heerka 1aad

Miisaaniyadda [BV_vx + BRV_vx] – Qoondaynta Maaliyadaha

Haddii ansaxinta dib-u-qoondaynta ay dhaafto tijaabada 10%, oo ayna weli ka jiraa maaliyado xor ah oo aan ku filneyn heerka kor ku xusan ee la soo xisaabiyay, dib-u-qoondaynta waa la diidi doonaa.

Haddii la diido, waxaa weli jiri kara maaliyadaha xorta ah ee heerka 2aad oo la heli karo oo loo adeegsan karo in lagu yareeyo qoondaynta maaliyadaha, sidaa awgeedna waxay kordhinayaan maaliyadaha xorta ah ee heerka 1aad ee la heli karo. Maaliyadaha xorta ah ee heerka 2aad waxaa loo xisaabiyaa sida soo socota.

Heerka 2aad

Qoondaynta Maaliyadaha – CV – PRV – PV

Qiimaha lagu go'aamiyo xisaabtan wuxuu bixin doonaa miisaaniyadda dheeriga ah ee la qoondeeyay ee xorta laga dhigi karo iyadoo keliya la diyaarinayo fawjarka qoondaynta maaliyadaha oo tabane ah oo gaaraya ilaa qiimaha qadarkan, sidaa awgeedna wuxuu si otomaatik ah u kordhinayaa maaliyadaha xorta ah ee Heerka 1aad ee la heli karo

Macnaha summadaha la adeegsadey:

- **BV**=Fawjarka Miisaaniyadda; **BV_vx** = Fawjarka Miisaaniyadda, nuqulka x
- **BRV**=Fawjarka Dib-u-qoondaynta Miisaaniyadda; **BRV_vx**= Fawjarka Dib-u-qoondaynta Miisaaniyadda, nuqulka x
- **FAV**=Fawjarka Qoondaynta Maaliyadaha
- **CV**=Fawjarka Ballanqaadka; **PRV**= Fawjarka Codsiga Lacag-bixinta; **PV**=Fawjarka Lacag-bixinta

Tusaalaha A ee loogu talagalay Wasaarad X:

Xaqiiqda:

1. Qaado shey 2 xariiqle ah, A & B, mid luminaya iyo mid helaya
2. BV_v1 @ 1,000 oo ka soo horjeeda xariiq A
3. Ma jiraan BRS la xiriira xariiq A
4. Maaliyadaha loo qoondeeyay (FAV) xariiq A waxay ahaayeen 200

Su'aal:

Wasaarad X waxay doonaysaa in ay 90 ka wareejiso xariiq A una wareejiso xariiq B, Wasaarad X dib ma u qoondeyn kartaa?

Jawaab:

Haa, sababtoo ah dib-u-qoondeynta la doonayo waa keliya 90% ee baaqiga miisaaniyadda waxaana jira lacag deyn ku jirin oo ku filan oo ah maaliyado xor ah oo Heerka 1aad oo la heli karo oo gaaraya 800 [1000-200]

Tusaalaha B ee loogu talagalay Wasaarad X:

Xaqiiqda:

1. Qaado shey 2 xariiqle ah, A & B, mid luminaya iyo mid helaya
2. BV_v1 @ 1,000 oo ka soo horjeeda xariiq A
3. BRV_v1 waxaa la diyaariyay iyadoo la barbardhigayo xariiq A oo 80 ka dhimey xariiq
4. Maaliyadaha loo qoondeeyay xariiq A waxay isku noqonayaan ilaa 920 iyo PRV waxaa hannaanka loogu diiwaangeliyaa 920

Su'aal:

Ka-dib marka BRV_v1 la diyaariyay, Wasaarad X waxay doonaysaa in ay dib ugu qoondeeyso 20 kale min xariiq ilaa xariiq B. Wasaarad X maku guulaysan kartaa dib-u-qoondeynta?

Jawaab:

Maya. Inkastoo Wasaarad X loo oggol yahay in ay wareejiso ilaa 100 (10%*1,000) oo ayna keliya dib-u-qoondeeyeen 80 ilaa hadda, looma oggolaanayo in ay dib u qoondeeyaan 20-ka dheeriga ah ee farsamo ahaan loo oggol yahay sababtoo ah waxaa jira maaliyadaha xorta ah ee Heerka 1aad oo la heli karo. Maaliyadaha xorta ah ee Heerka 1aad ee la heli karo waa 0 [1,000-80-920].

Tusaalaha C ee loogu talagalay Wasaarad X:

Xaqiiqda:

1. Qaado shey 2 xariiqle ah, A & B, mid luminaya iyo mid helaya
2. BV_v1 @ 1,000 oo ka soo horjeeda xariiq A
3. BRV_v1 waxaa la diyaariyay iyadoo la barbardhigayo xariiq A oo 80 ka dhimey xariiq
4. Maaliyadaha lagu qoondeeyay (FAV) xariiq A waxay isku noqonayaan 920
5. CV ayaa loogu diiwaangeliyaa hannaanka 600

Su'aal:

Ka-dib marka BRV_v1 la diyaariyay, Wasaarad X waxay doonaysaa in ay dib ugu qoondeyso 20 kale min A xariiq ilaa xariiq B. Wasaarad X maku guulaysan kartaa dib-u-qoondeynta 20 dheeraad ah?

Jawaab:

Haa. Fawjarka dib-u-qoondeynta waa la diyaarin karaa, haseyeeshee, fawjarka dhimidda qoondeynta maaliyada waa in marka hore la diyaariyo iyadoo lala eegayo xariiq A qiimo gaarayo 20 ama in ka badan. Haddii aad iskudaydo in aad dib-u-qoondeyso 20 ka hor, waa la diidi doonaa iyadoo sabab u ah sababta lagu sheegay Tusaale B. Haseyeeshee, si ka duwan Tusaale B, qoondeynta maaliyadaha oo dhammeystiran lama adeegsan. Tusaalahan, waxaa jira maaliyadaha xorta ah ee Heerka 2aad oo la heli karo oo gaaraya 320 (920-600). Si loo abuuro maaliyadaha xorta ah ee Heerka 1aad oo ku filan oo la heli karo, qoondeynta waa in la soo dhimaa oo laga dhigaa ilaa 320 oo aysana keenin walaac. Marka la dhimo qoondeynta maaliyadaha, tani waxay si otomaatik ah u kordhinaysaa maaliyadaha xorta ah ee Heerka 2aad ee la heli karo.

Tusaalaha D ee loogu talagalay Wasaarad X:

Xaqiiqda:

1. Qaado shey 2 xariiqle ah, A & B, mid luminaya iyo mid helaya
2. BV_v1 @ 1,000 oo ka soo horjeeda xariiq A
3. BRV_v1 waxaa la diyaariyay iyadoo la barbardhigayo xariiq A oo 80 ka dhimey xariiq
4. Inta lagu guda jirro geeddi-socodka miisaaniyadda dheeriga ah ee bartamaha sannadka, dowladdu waxay go'aamisay in xariiq A ee Wasaarad X in aan loo baahnayn iyo in maaliyadaha lagu adeegsan karo meelo kale. Waxaa la go'aamiyay in xariiq A ee Wasaarad X keliya uu u baahan yahay in uu leeyahay haraa gaaraya 400.

Su'aal:

Waa maxay qiimaha BV_v2 (miisaaniyadda dheeriga ah) ee loo baahan yahay si loogu aadiyo xariiq A haraaga 400 ah?

Jawaab:

BR_v2 loogu talagalay xariiq A waa -520, waxaa loo xisaabiyey sida soo socota:

$$\begin{aligned} \text{BV}_v2 \text{ (dheeri ah)} &= \text{Qiimaha Dheeriga ah} - [\text{BV}_v1 \text{ +/- BRV}_v1] \\ -520 &= 400 - [1,000 - 80] \end{aligned}$$

Tusaalaha E ee loogu talagalay Wasaarad X:

Xaqiiqda:

1. Qaado shey 2 xariiqle ah, A & B, mid luminaya iyo mid helaya
2. BV_v1 @ 1,000 oo ka soo horjeeda xariiq A
3. BRV_v1 waxaa la diyaariyay iyadoo la barbardhigayo xariiq A oo 80 ka dhimey xariiq
4. BRV_v1 (BRV dheeri ah oo la diyaariyay iyadoo lala eegayo xariiq A) oo ku dartey 15
5. Inta lagu guda jirro geeddi-socodka miisaaniyadda dheeriga ah ee bartamaha sannadka, dowladdu waxay go'aamisay in xariiq A ee Wasaarad X uu u baahan yahay maalgelin

dheeraad ah. Waxaa la go'aamiyay in xariiq A ee Wasaarad X hadda uu u baahan yahay in uu leeyahay haraa gaaraya 2,500.

Su'aal:

Waa maxay qiimaha BV_v2 (miisaaniyadda dheeriga ah) ee loo baahan yahay si loogu aadiyo xariiq A haraaga 2,500 ah?

Jawaab:

BR_v2 loogu talagalay xariiq A waa 1,565, waxaa loo xisaabiyey sida soo socota:

$$\begin{aligned} \text{BV_v2 (dheeri ah)} &= \text{Qiimaha Dheeriga ah} - [\text{BV_v1} +/\text{- BRV_v1}] \\ 1,565 &= 2,500 - [1,000 - 80 + 15] \end{aligned}$$

Tusaalaha F ee loogu talagalay Wasaarad X:

Xaqiiqda:

1. Qaado shey 2 xariiqle ah, A & B, mid luminaya iyo mid helaya
2. BV_v1 @ 1,000 oo ka soo horjeeda xariiq A
3. BRV_v1 waxaa la diyaariyay iyadoo la barbardhigayo xariiq A oo 80 ka dhimey xariiq
4. BRV_v1 (BRV dheeri ah oo la diyaariyay iyadoo lala eegayo xariiq A) oo ku dartey 15
5. BV_v2 waxaa loo diyaariyay 1,565
6. FAV waxaa loo diyaariyay 1,200

Su'aal:

Waa maxay qadarka ugu badan ee la heli karo ee xaq u leh dib-u-qoondaynta ka timid xariiq A?

Jawaab:

250, loo xisaabiyay sida soo socota:

$$\begin{aligned} & 10\% * [BV_v1 - BRV_v1 + BRV_v1 + BV_v2] \\ & 10\% * [1,000 - 80 + 15 + 1,565] \\ & 10\% * 2,500 \end{aligned}$$

Tusaalaha G ee loogu talagalay Wasaarad X:

Xaqiiqda:

1. Qaado shey 2 xariiqle ah, A & B, mid luminaya iyo mid helaya
2. BV_v1 @ 1,000 oo ka soo horjeeda xariiq A
3. BRV_v1 waxaa la diyaariyay iyadoo lala eegayo xariiq A oo ka dhimey xariiq 80
4. BRV_v1 (BRV dheeri ah oo la diyaariyay iyadoo lala eegayo xariiq A) oo ku dartey 15
5. BV_v2 waxaa loo diyaariyay 1,565
6. FAV waxaa loo diyaariyay 2,300
7. CV waxaa loo diyaariyay 2,000
8. Ma jiraan PRVs ama PVs

Su'aal:

Wasaarad X dib ma u qoondayn kartaa 225 oo laga soo qaado xariiq A lana geeyo xariiq B? Fadlan sharaxaad ka bixi sababaha jawaabtaada.

Jawaab:

Haa, balse waa geeddi-socod laba tallaabo ah. Inta ugu badan ee dib loo qoondayn karo waa 250 sida lagu xisaabiyay Tusaale F. Haseyeeshee, Maaliyadaha Heerka 1aad ee la heli karo waa keliya 200 [2,500-2,300], sidaa darteed hannaanka ma oggolaanayo dib-u-qoondaynta 250. Maaliyadaha Heerka 2aad ee la heli karo waxaa lagu xisaabiyaa 300 [FAV-CV] ama 2,300-2,000. Sidaa darteed, ka hor inta Wasaarad X dib loo qoondayn 225, waa in ay kordhiyaan maaliyadaha xorta ah ee Heerka 1aad ee la heli karo. Tani waxaa la gaaraa iyadoo la diyaarinayo dhimidda qoondaynta maaliyadaha ee loogu talagalay qiimaha 25 ama in ka badan. Marka tani la diyaariyo, tani waxay si otomaatik ah u kordhinaysaa maaliyadaha Heerka 1aad ee la heli karo